# DUGSIGA SARE IDA B. WELLS
# AXDIGA GUDDIGA QORSHEEYNTA DHAMAYSTIRAN (CPC)

**Axdiga Guddiga Qorsheeynta Dhamaystiran ee Ida B. Wells**
**(La sameeyay 8-22-23)**

**Ujeedada iyo Doorka CPC**

Hadafka Guddiga Qorshaynta Dhamaystiran ee Dugsiga Sare Ida B. Wells waa in la sameeyo qorshe dhammaystiran, siman iyo isku dhafan oo loogu talagalay Dugsiga Sare Ida B. Wells oo la casriyeeyay iyada oo loo marayo ka-qaybgal bulsho oo dhab ah. Waxaa ku jiri doona arday, waalidiin, macalimiin, qalinjabiyeyaasha, maamulayaal, shaqaalaha PPS, la-hawlgalayaasha, wakiilada bulshada iyo xubin guddiga dugsiga.

Tan waxaa lagu dhammayn doonaa hannaan fikir leh oo ay ka go'an tahay ka-qaybgalka bulshada Ida B. Wells dhexdeeda. Kooxda mashruuca ee degmadu waxay si toos ah ula shaqayn doonaan CPC si ay u hubiyaan in welwelkooda iyo rabitaankooda la fahmo lana tixgeliyo.

CPC waxay uruurisaa oo isku daraysaa talooyinka bulshada oo dhan, waxayna la kaashanaysaa faahfaahinta kobcaysa ee mashruuca xubnaha kale ee bulshada Ida B. Wells. CPC waxay noqon doontaa qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshaynta wajiyada badan iyo habka ka-qaybgalka daneeyayaasha kaas oo ay ku jiraan Degmada iyo shaqaalaha dugsiga, ardayda, iyo xubnaha bulshada oo dhamaantood ay hagi doonaan kooxda naqshadaynta la-taliyaha. Falanqaynta mashruuca waxaa ku jiri doona noocyo kala duwan oo dukumeenti hore ah, shuruudaha dhismaha, goobta, miisaaniyada iyo sharciyeynta kuwaas oo ay tahay in loo isticmaalo qiimaynta xulashooyinka naqshadaynta. *Iyadoo xubnaha CPC aan loo xilsaarin inay gaaraan go'aannada kama dambaysta ah, taladooda ayaa muhiim u ah abuurista qorshe dhammaystiran oo bulshada dhan ay ku faani karto.*

**OGOW:** Barnaamijka Bond-ka 2020 kuma jiro maalgelinta dhismaha ee Dugsiga Sare Ida B. Wells. Maalgelinta dhismaha waxay u baahan doontaa inay ka timaado Bond-ka Horumarinta Dugsiga ee PPS mustaqbalka.

Doorka iyo mas'uuliyadaha xubnaha CPC:

- Ka-qaybgal shirarka si aad ugala taliso kooxda mashruuca welwelka, arrimaha, yoolalka iyo rabitaanka ee bulshada dugsiga.
- U hogaansan anshaxa iyo xeerka anshaxa ee CPC.
- U soo warbixi iyo ka soo qaad jawaab celinta kooxaha iyo ururrada xubnaha CPC ay matalaan.
- Ka bixi talo ku saabsan xeeladaha isgaarsiinta si loo gaarsiyo dhammaan bulshada dugsiga habsocodka mashruuca iyo dhacdooyinka ka-qaybgalka dadweynaha.
- Waxa laga yaabaa inaad kooxda mashruuca ka caawiso shirar dadweyne oo furan.

- Waxa laga yaabaa inaad ka caawiso dhacdooyinka bilowga dhismaha iyo furitaanka weyn.

**Xubinimada**

Xubnaha CPC waxa laga filayaa inay shaqeeyaan ku dhawaad 6 bilood inta lagu jiro marxaladda qorshaynta dhammaystiran. Fursado dheeraad ah oo ka-qaybqaadasho ayaa laga yaabaa in la helo inta lagu jiro wejiyada naqshadaynta ee xiga.

Shaqaalaha Degmadu waxay dooran doonaan oo magacaabi doonaan xubnaha CPC iyagoo u maraya hab codsi furan. Codsadayaasha dheeraadka ah ayaa laga yaabaa in la shaqaaleysiiyo si loo xaqiijiyo matalaad buuxda oo dheelitiran oo bulshada dugsiga ah.

CPC waxay soo magacaabi doontaa ***Guddoomiye*** ama ***La-gudoomiyeyaal*** si ay uga caawiyaan ajendaha kulanka CPC, dib u eegista soo jeedinta, iyo hab-maamuuska kulanka. *Shaqaalaha PPS iyo xubnaha Guddiga ma noqon karaan Guddoomiye/La-gudoomiyeyaal.*

CPC waa in ay ku jirtaa ugu yaraan hal xubin mid kasta oo ka mid ah kooxaha daneeyayaasha ee soo socda: waalidiinta dugsiga, waalidiinta xaafadda, ururada xaafadaha, ururada ganacsiga, barnaamijka dugsiga, wada-hawlgalayaasha goobta suurtagalka ah iyo/ama raasamaal, ardayda, macalimiinta, iyo wakiilka guddiga dugsiga.

Xubinta doonaysa in ay ka baxdo CPC waa in ay qoraal ku socodsiisaa maamulaha mashruuca ee degmada; iimayl waa la aqbali karaa.

Haddii xubin ka mid ah ay ku guuldareysato inay ka-qaybgasho laba kulan oo isku xigta oo CPC ah iyada oo aan loo helin cudurdaar macquul ah, ama haddii kale ay awoodi waydo inay ka mid noqoto CPC, maamulaha mashruuca ee degmadu wuxuu ku dhawaaqi karaa booska CPC inay banaan tahay oo u magacaabo qof kale oo ku haboon CPC.

**Kooxda Mashruuca**

Kooxda mashruucu waxay ka koobnaan doontaa naqshadeeyayaasha, injineerada, qorshayaasha, maamulayaasha mashruuca Xafiiska Casriyeynta Dugsiga (OSM) iyo shaqaalaha PPS. Waxay bixin doonaan ajandayaal, bandhigyo iyo tixgelin goobta; kooxda mashruucu waxay sidoo kale fududayn doontaa doodaha, diiwaan gelinta talooyinka, horumarinta falanqaynta iyo doorashooyinka shirarka CPC.

Maamulayaasha mashruuca OSM, oo degmada u ah xiriirka koowaad ee mashruuca, ayaa kormeeri doona shirarka CPC iyo dhacdooyinka ka qaybgalka dadweynaha. Dhammaan

isgaarsiinta xubnaha CPC ee ka baxsan shirarka CPC waa in lagu jiheeyaa maamulayaasha mashruuca PPS.

Go'aan ka gaarista mashruucu waxay noqon doontaa mas'uuliyadda Xafiiska Casriyeynta Dugsiga iyadoo la kaashanaysa Hoggaanka kale ee Degmada sida loogu baahdo. ***Xubnaha CPC waxay qabtaan door la-talin oo keliya, mana aha wakiillada degmada ee rasmiga ah.***

**Jadwalka Shirka CPC & Qaabka**
Ballanqaadyada la qiyaasay waxaa ka mid ah: Ka qaybgalka shirarka caadiga ah (qiyaastii bishii hal mar) inta lagu jiro xagaaga dambe ilaa horraanta jiilaalka sannad dugsiyeedka 2023-24. Wakhtiga dhacdooyinkan waxa la waafajin doona jadwalka mashruuca iyo dhacdooyinka kale ee ka qaybgalka daneeyayaasha dugsiga iyo degmada.

Kulamada CPC waxay ka dhici doonaan Dugsiga Sare Ida B. Wells. Qolka gaarka ah ee shirarka waa in la go'aamiyaa.

Jadwalka buuxa ee Kulamada CPC waa la sameynayaa, waxaana lagu dhawaaqi doonaa marka guddiga la sameeyo.

Kulamada CPC waxay u furan yihiin dadweynaha, waxayna siinayaan fursad ay dadweynuhu ka faalloodaan dhammaadka shirarka; agabka kulanka iyo qoraalada kulanka waxa lagu soo dhejin doonaa onlaynka.

**Faallooyinka Dadweynaha ee Kulamada**
Fursadda ra'yiga dadweynaha ayaa la bixin doonaa dhammaadka kulan kasta. Faallaynta dadweynuhu waxay ku koobnaan doontaa 10 daqiiqo ugu badnaan 3 daqiiqo oo marag ah qofkiiba. Kuwa doonaya inay marag ka bixiyaan CPC waxay u baahan doonaan inay iska diiwaan galiyaan kulanka. Markhaatigu wuxuu u dhici doonaa siday u kala horreeyaan. Kaararka faallooyinka ayaa la bixin doonaa kulan kasta. Dadweynaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay CPC-ka u bixiyaan faallooyin qoraal ama iimaylka ah. Faallooyinka iimaylka waxa lagu soo diri karaa schoolmodernization@pps.net .

**Anshaxa CPC**
Qodobkan anshaxu wuxuu siinayaa habraac hawleed guud oo loogu talagalay xubnaha CPC inay raacaan gudashada doorkooda. Dhammaan arrimaha anshaxa ee xubnaha CPC ay la kulmaan hoos laguma xusin. Si kastaba ha ahaatee, dukumeentigani wuxuu sheegayaa qaar ka mid ah meelaha muhiimka ah ee caawinaya qeexida anshaxa iyo anshaxa xirfadeed ee xubnaha CPC.

- Xubnaha CPC waa tabaruce, mana ka helaan degmada wax magdhow ah si toos ah ama si dadban

adeegyadooda xubnaha guddiga.

- Xubnaha CPC lama yeelan karaan degmada qandaraas hadda ah ama la sugayo, mana geli karaan heshiis inta ay ku jiraan muddada ay shaqada ku jiraan.
- CPC kuma jirto wax iibiye, qandaraasle ama lataliye kasta oo degmada ah.

**IS KHILAAFKA DANAHA:**
Xubin ka tirsan CPC waa in aanu samayn ama saamaynayn go'aanka degmada ee la xiriira:

- qandaraas kasta oo lagu maalgeliyo dakhliga bond-ka; ama
- mashruuc kasta oo dhismo ah oo ka faa'iidaysan doona xubinta CPC ee ka baxsan shaqada, ganacsi, ama siiso faa'iido lacageed xubin qoyska ka mid ah, sida xaaska, ilmaha, waalid ama walaal.

**SHAQADA BANNAANKA:**
Xubin ka tirsan CPC waa in uusan u isticmaalin awooddiisa arrin gaar ah si uu ugala xaajoodo shaqada mustaqbalka ama qandaraas qof kasta ama hay'ad la xiriirta:

- qandaraas kasta oo lagu maalgeliyo dakhliga bond-ka; ama
- mashruuc kasta oo dhismo ah.

Xubinta CPC waa in aanay samayn ama saamaynayn go'aanka degmadda ee la xiriira mashruuc kasta oo dhisme ah oo ku lug leh danta qofka ay xubintu la leeyahay heshiis ku saabsan shaqada hadda ama mustaqbalka, ama mushaharka nooc kasta ah.

Muddo hal (1) sano ka dib markii uu ka tagay CPC, xubin hore ee CPC ma matali karo qof ama hay'ad si uu  helo magdhow oo la xiriira arrin kasta oo ka jirta degmada oo, xubin CPC ahaan, ay uga qaybqaateen shakhsi ahaan. Gaar ahaan, muddo hal (1) sano ah ka dib marka uu ka tago CPC, xubin hore oo CPC ah iyo shirkadaha iyo ganacsiyada uu xubinku u shaqeeyo waa in laga mamnuucaa inay qandaraas la galaan degmada marka la eego:

- u dalbashada ama soo jeedinta bixinta adeegyada mashaariicda ay maalgeliso bond-ka; iyo/ama
- mashruuc kasta oo dhisme ah oo ay maalgeliso degmadu.

**BALLANQAADKA ILAALINTA SHARCIGA:**
Xubin kasta oo CPC ah ayaa ilaalin doona dastuurka federaalka iyo Oregon, sharciyada iyo xeerarka Maraykanka iyo Gobolka Oregon, iyo nidaamyada, sharciyada iyo xeerarka Dugsiga Dadweynaha Portland.

**BALLANQAADKA DADWEYNAHA:**
Xubin kasta oo ka tirsan CPC waa in uu danta guud ka sarraysiiyo danta shaqsi ama ganacsi ee xubinta.